



HOWLGALKA: Guddiga Dugsiga Jaatarka Maine (Main Charter School Commission) waxay bixinayaan maamul fikradeysan oo lagu ansixinayo laguna kormeerayo dugsiyada bulshada jaatarka oo waafaqsan sharciyada Gobolka si loogu aasaaso dooqyo waxbarasho tayo sarreysa oo gaar u ah ardayda Maine.

2,000+ Arday
Diiwaangashan



Ardayda Ka
Diiwaangashan 294
Magaalo iyo tuulo
oo Maine oo dhan
ah



9 Dugsi

UJEEADADA: Si loogu oggolaado dugsiyasda jaatarka in loo aasaaso sida dugsiyada jaatarka ee:

- Sare u qaado waxbarashada ardayda iyada oo la abuurayo dugsiiyo aad u tayo sarreeyo oo leh heerar sareeyo oo waxqaabdkaa ardayda;
- Meelaha bannaan ee guusha dhow oo u dhaxeeyso kooxyada waxqaabdkaa sarreeyo iyo kuwa waxqaabdkaa hooseeyo ee ardayda dugsiga bulshada;
- Kordhiyo fursadaha waxbarashada tayada sareeyso ee gudaha nidaamka waxbarashada bulshada;
- Siiyo jawiyo waxbarasho kale ardayda aanan hormarineynin goobaha dugsiga dhaqanka;
- Abuur fursadaha xirado cusub oo macalimiinta iyo shaqaalaha kale ee dugsiga;
- Ku dhiirogeliyo isticmaalka noocyada kala duwan, tayo sareeyo oo barida iyo qeybaha waxbarashada; iyo
- Siiso ardayda, waaaldiinta, xubnaha bulshada iyo shirkadaha deegaanka fursado la balaariyay oo ka qeybgalka nidaamka waxbarashada bulshada.

182 State House
Station
Augusta, ME
04333-0182

*Nagala
soo
Xiriir!*

mcsc@maine.gov
(207)624-6720

Sheekooyinka Caadiga ah ee ku Saabsan Dugsiyada Jaatarka Bulshada

SHEEKO: Macalimiinta dugsiya jaatarka uma baahno in la shatiyeeyo.

XAQIIQDA: Dugsiya bulshada jaatarka waa inuu u hogaansanaadaa sharciyada faderaalka ee quseeyo iyo sharuudaha la xiriiro u qalmida macalimiinta iyo shaqaalaha machadka kale. Dhammaan macalimiinta waqtiga buuxo ee dugsiya jaatarka bulshada Maine waa inay haystaan shahaadada barida ku haboon ama lagu shahaadeeyo 3 sanno gudahood ee ka bilaabneyso taariiqda la kireystay, marka laga reebo kuwa leh shahaadada sareeyso, iyo shahaadada xirfada, ama taqasus gaar ah ee aaga manhajka ee ay baraan.

SHEEKO: Dugsiyada jaatarka looma baahno inay buuxiyaan isla heerarka waxbarashada sida dugsiyada degmada.

XAQIIQDA: Dugsiyada jaatarka bulshada waxaa looga baahanyahay inay buuxiyaan isla heerarka waxbarashada iyo Natiijoyinka Waxbarashada Maine sida dugsiyada degmada bulshada dhaqanka. Waxaa intaas dheer, waa inay buuxiyaan qiyaashaa la xisaabtanka ee heshiiskooda ay la galaan ansixiyaha.



SHEEKO: Dugsiyada jaatarka waa dugsiyo gaar ah.

XAQIIQDA: Dugsiyada jaatarka waa dugsiyo bulsho, oo ka qeyb ah nidaamka waxbarashada bulshada Maine.

Dugsiyada jaatarka bulshada Maine:

- Waa inay ahaadaan kuwa aan diin aheyn;
- Waa inay ahaadaa waxbarasho bilaash ah;
- Uma baahnaan karaan imtixaanada gelitaanka;
- Waa inay ogolaadaan si simman dhammaan ardayda;
- Waa in, xaqiijiyaan helitaan simman, qabtaan baqtayaanasiib haddii arday badan ay codsadaan kadib waxaa jiro boos.

SHEEKO: Dugsiyada jaatarka waxaa loogu talogalay ardayda “dhibka badan”.

XAQIIQDA: Dugsiyada jaatarka bulshada waa ardayda oo dhan. Dugsiyada jaatarka way ku kala duwanyihiin howgalada, barnaamijyadooda, iyo dadka ay u adeegaan.

SHEEKO: Dugsiyada jaatarka waa “xadida lacag” ee ka imaado nidaamka dugsiya bulshada.

XAQIIQDA: Maadama dugsiyada jaatarka ay yihiin dugsiyada bulshada, lacagta raacdo ardayda doorata inay ka qeybgalaan dugsiyada jaatarka waxay ku haraan nidaamka waxbarashada bulshada.

SHEEKO: Dugsiyada jaatarka waxay helaan lacagta gobolka oo ka badan dugsiyada degmada dhaqanka.

XAQIIQDA: Deeqaha waxbarashada ardayga hore ee gobolka waxay u raacaan arday walba degmada ama dugsiya jaatarka sida waafaqsan isla qaababka “Qoondaynta Barnaamijka Muhiimka ah” (EPA). Dugsiyada degmada waxay u helaan maalgelinta gobolka oo badan howlgabka macalimiinta, dhismaha xarunta iyo dayactirka, iyo wixii qarashaadka caasimada sida basaska dugsiya. Inta badan dugsiyada degmada waxay sidoo kale ku helaan deeqaga deegaanka “qoondaynta dheeraadka ah”. Jaatarada kuma canshuuri karaan hantiyada, taas oo ah illaha daqliga oo dheeraadka ku ah dugsiyada degmada.

SHEEKO: Dugsiyada jaatarka ma bixiyaan adeegyada waxbarashada gaarka ah.

XAQIIQDA: Dugsiyada jaatarka waa inay ku bixiyaan adeegyada waxbarasho gaarka sida waafaqsan isla sharuudaha faderaalka iyo gobolka ee quseeyo dugsiyada degmada.

SHEEKO: Dugsiyada jaatarka waxaa kaliya oo ay u adeegaan ardayda hobbada leh.

XAQIIQDA: Dugsiyada jaatarka waxay u furanyihiin dhammaan oo malahaan karaan sharuudaha gelitaanka. Dugsiyada jaatarka bulshada ma xadidi karaan ogolaanshaha ardayda oo ku saleysan kartida caqliga, qiyaasaha guusha ama ku haboonaanta, ama kartida ciyaaraha.